

Asxaabta Qaaliga ahow,

Anigoo ku hadlaya magaca Guddiga Hawlgelinta Shaqaalaha (Employee Engagement Working Group), waxaan ku faraxsanahay inaan idin la wadaago war ku saabsan shaqadeena.

Guddigu waxay isku yimaadeen bishii Ogoosto waxayna kulmaan labadii toddobaadba mar. Guddigu wuxuu wax ku bilaabay samaynta [xeerar kulan](#) waxayna kulmeen afar jeer. Waxaan go'aan ka gaarnay baaxadda shaqadeena, waxyaabaha diirada la saarayo iyo xogta dib-loo-eegay, waxaana sameynay falanqaynta SWOT si aan u baarno awoodaha, liidashada, fursadaha, iyo khataraha iyo soo jiidashada loona xajisto shaqaalaha fiican. Ugu dambayntii, waxaanu samaynay qorshe wadaxiriir si aanu u xaqiijino hufnaanta. Dadka doonaya inay si joogta ah u ogaadaan horusocodka guddiga waxay heli karaan warbixinta kulanka ee ku jirta [mareegta hawlgelinta ee Waaxda Shaqaalaha \(HR\)](#).

Ujeeddada shaqada guddigu waa in la aqoonsado saddex iibiyayaasha sahanka hawlgelinta shaqaalaha ee suurtagalka ah si loogu soo bandhigo shaqaalaha sare bisha Diseembar. Shaqaalaha sare ayaa samayn doona xulashada ugu dambaysa, iyadoo qorshuhu yahay in la bilaabo sahan bisha Febraayo.

Intii la isku diyaarinayay aqoonsashada iibiyayaasha sahanka, guddigu waxay qiimeeyeen fikradihii la soo uruuriyay intii lagu gudajiray fadhiiyadii dacwad-dhegeysi ee gu'ga, waxay baareen agabka Bareyaasha iyo Shaqaalaha Bates (BESO) ee dhigaya waxyaabaha mudnaanta leh, waxayna sameeyeen qiimeynta SWOT.

Kadib markay dib-u-eegeen xogta, guddigu waxay ka wadahadleen awoodaha, liidashada, fursadaha, iyo khataraha ku wajahan inaan awoodno shaqaalaha hadda noo joogo iyo kuwa mustaqbalka inay rabaan inay inoo yimaadaan oo ay sii shaqeeyaan. Xogta waxaa la soo saaray iyadoo warbixino kooban ah oo leh mowduucyo, caqabado, fursado, iyo aaggaga diirada la saarayo. Fadlan ka eeg tafaasiisha [halkan](#). Guddiga waxay u isticmaali doonaan macluumaadkan si ay u aqoonsadaan sahanada wata su'aalaha ee lagu baarayo qaybahaan waxayna u oggolaan doonaan shaqaalaha inay muujiyaan aragtidooda.

Guddiga ayaa ogaadeen [hababka ugu fiican](#) ee sahanka hawlgelinta shaqaalaha waxaana looga wadahadlay qaabab kala duwan [noocyada iibiyayaasha sahanka](#). Waxaan bilaabi doonaan inaan dib-u-eegis ku samayno iibiyayaasha sahanka ee suurtagalka ah kulankeena soo socda.

Fadlan raadi wargelinteenaa soo socota ee bisha Nofeembar oo ku soo toosi su'aalaha, faallooyinka, iyo talooyinka iimaylka engagement@bates.edu ama [xubin guddiga ka mid ah](#).

Mahadsanid,

Guddiga Rajada iyo Hawlgelinta